



HORUMARINNADA WADDADA BAASKIILKA IYO QURXINTA JIDKA EE PIKE PINE

Mashruuca Horumarinnada Waddada Baaskiilkka iyo Qurxinta Jidka ee Pike Pine waxaa hormuud ka ah ama wada Xafiiska Mashaariicda Biyo-xigeenka iyo Kuwa Madaniga ah ee Magaalada Seattle (City of Seattle's Office of the Waterfront and Civic Projects) oo kaashanaya Ururka Faras-Magaalka/Magaalada Hoose ee Seattle iyo Waaxda Gaadiidka Seattle. Horumarinnadan waxay qayb ka yihiin Barnaamijka Seattle ee Biyo-xigeenka Magaalada waxayna ku guuleysan doonnaan ujeeddada muhiimka ah ee sii wanaajinta isku-xiriirinta bari-galbeed ee u dhaxeeya biyo-xigeenka iyo xaafadaha ku hareeraysan.

Mashruucan wuxuu abuuri doonnaa wado dadka lugeeyaa ay maraan, ammaan ah oo soojiidasho leh kana bilaabaneysa Capitol Hill ilaa Suuqa Pike Place iyo biyo-xigeenka. Wuxuu kaloo sii wanaajinaya jidodka ay baaskiiladu maraan ee ilaalsan wuxuunna buuxin doonnaa daldaloollada hadda ka jira shabakada baaskiilkka.

TILMAAMAHAA MUHIIMKA AH

Tilmaamaha isku-midka ah ee bilow ilaa dhammaadka marinka ayaa waxay abuuri doonnaan joogteynta iyo aqoonsiga jidodka Pike iyo Pine, oo ay ku jiraan:



DAYACTIRKA
MEESHA U
CALAAMADEYSAN
DADKA LUGEYNAYA
IN AY JIDKA KA
GUDBAAN



KURAAS



JIDAD AY
BAASKIILADU
MARAAN OO
ILAALSAN



GEEDO BADAN
IYO QURXINTA
DHULKKA

MASHRUUCA WAXAA UU HORSEEDAYAA YOOLAL DHOWR, OO AY KU JIRAAН:



Jidka Pike iyo 2nd Ave oo eegaya dhanka galbeed

AMMAANKA

Waddooyinka Pike iyo Pine waxay mudnaansiin doonnaan ammaanka dhammaan adeegsadayaaasha waxayna leeyihii meelo u calaamadeysan dadka lugeynaya in ay jidka ka gudbaan, waddooyin hareermara jidka oo ballaaran iyo jidat ay baaskiiladu maraan oo ilaalsan. Ballooga 100 ee Jidka Pike, ee ku dheggan Suuqa Pike Place Market, waxayna yeellan doonnaan jid aan kaabbi tahayn si loo dejiyo/xassaliyo baaburta soconaysa.



Jidatka Pine St iyo Boren Ave oo eegaya dhanka bari
Sawirka waxaa iska leh ZGF Architects oo kaashaneya LMN Architects..
Wax u eg ama la mid ah WSCCA ayaa la soosaarey iyadoo la kaashannaya LMN Architects.



GOOBABA DADWEYNAHA EE DHAQDHAQAAQA LEH

Waxaa jiri doonno dhir cagaaran oo badan iyo farshaxan u gaar ah marinka. Kuraasta dadweynaha iyo makhaayadaha socod-hareereedyada ku yaalla ayaa sidoo kale gacan ka geysan doonna abuurista meelo lagu raago oo nolosha magaalada lagu qaato.



Seattle
Office of the Waterfront
and Civic Projects

Jidka Pine iyo 3rd Ave oo eegaya dhanka bari

HORUMARINNADA LA SOO-JEEDIYAY

JIDADKA 1ST - 4TH

- Jid aan kaabad lahayn oo la wadaago kuna yaalla baloogga 100 ee Jidka Pike
- Kororka in la akhrin karo qoraallada meelaha boosteejada rakaabka laga galoo
- Xaaridda dhabbaha socod-hareereedka oo tayo joogto ah leh iyo meelo u calaamadeysan dadka lugeynaya in ay jidka ka gudbaan
- Jidad ay baaskiiladu maraan oo ilaalsan oo leh saalta-dhawre kaabad leh iyo dhir dhulka ku beeran
- Socod-hareereed la ballaariyey oo ku yaalla Jidka Pine inta u dhaxeyso waddooyinka 3rd iyo 4th
- Goobo alaabooiyinka laga raro lagana soo dejijo



Waxaannu istusineynaa marin firfircoon oo leh meel dadweyne oo shaqeynaya.

XOOJINTA AQOONSIGA MARINKA IYADA OO FARSHAXAN LOO MARAYO

Derek Bruno iyo Gage Hamilton waxay soo saareen farshaxan muujin doona quruxda muuqaalka waddooyinka Pike iyo Pine iyada oo la adeegsanayo qaabab hirar ah oo la dhaxgelinayo xayndaabyada/deyrka, weelasha dhirta lagu beero iyo saalta-dhawryada baaskiillada. Qaababka hirarka ah waxay noqon doonnaan kuwo qalloocan oo biyo oo kale ah marka loo dhowaado Sound (biyo-xigeenka) waxayna noqon doonnaan kuwo xaglo leh oo sida buurta oo kale ah marka ay u dhow yihii Summit (Capitol Hill). "Sound ilaa Summit" waxay gacan ka geysan doonnaan in ay marinku siiyan aqoonsi wadareed.

JIDADKA 4TH - 9TH

- Nakh-shadda meelaha ay dadka ka gooyaan oo gaar ah
- Jidad ay baaskiiladu maraan oo ilaalsan oo leh saalta-dhawre kaabad leh iyo weelal dhir ku beeran
- Waddo uu baaskiilku maro oo tayo sare leh kuna taalla Pike St inta u dhaxeyso jidada 6th iyo 9th
- Beeridda geedaha maqan iyo baar-gaabinta geedaha jira
- Farshaxan dadweyne iyo qurxinta muuqaalka dhulka oo laga hirgelinayo marinka oo dhan
- Dhisidda iyo hawlgelinta barnaamijka oo guul leh

JIDADKA 9TH - MELROSE

- Jidad hal-dhinacle ah oo gaaraya bariga jidka Bellevue, oo suuragelinaya meelo badan oo bannaan oo ay maraan dadka lugeynaya iyo baaskiillada kuwaas oo sidoo kale oggolaanaya socodka gaadiidka.
- Socod-hareereedyo ballaaraan, oo ka fogeynaya dadka lugeynaya qaylada jidka halawsiga ah
- Teed dheer oo nalal leh
- Kororka qurxinta muuqaallada dhulka
- Jidad ay baaskiiladu maraan oo ilaalsan

LA NAKHSHADEYNTA BULSHADA

Mashruuca waxaa lagu saleeyay aragtida bulshada bilow ilaa dhammaadka hannaanka mashruuca. Waxaan ku martiqaadney oo aan kala qaybgaliney dadweynaha iyo daneeyayaashaba shirar dadweyne, xog-warraan iyo munaasabado soo-boodyo ah.



Nakhshad ama qaab u ek saalta-dhawraha baaskiilkha oo u dhow biyo-xigeenka oo leh calaamad hirar oo soo-jeedinaysa biyaha iyo Puget Sound.

SU'AALO AMA FAALLOOYIN?

Nagu soo booqo: waterfrontseattle.org
Email noogu soo dir: info@waterfrontseattle.org
Naga soo wac: 206.499.8040



Seattle
Office of the Waterfront
and Civic Projects